## XEERARKA IYO SHURUUCDA NEBRASKA

Macluumaadka DME waxa uu ku jiraa Xeerarka Maamulka ee Nebraska:

- *Cinwaanka 471 NAC Cutubka 7 Qalabka Caafimaadka ee Waara, Qalabka Dhameystirka Xubnaha, Qalabka Cabbiraadda, iyo Agabka Caafimaadka (DMEPOS)*

Xeerarkan waxa ay xukumayaan adeegyada lagu bixiyo hoos yimaada Xeerka Caawinta Caafimaadka, Sharciga La Habeeyey ee Nebraska (Neb. Rev. Stat.) §§ 68 901 et seq.



**Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:**
**[https://dhhs.ne.gov/](https://dhhs.ne.gov/)**

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska

Qaybta Carruurta iyo Adeegyada Qoyska

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.
DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

# Qalabka Caafimaadka ee Waara



DD-PAM-10 7/2025

***Caawinta dadka inay ku noolaadaan nolol wanaagsan***

# Qalabka Caafimaadka ee Waara (DME)

DME waxaa ka mid ah qalabka caafimaad iyo agabka loogu talagalay in lagu caawiyo dadka qaba xaalado caafimaad, naafo, ama dhaawacyo. Qalabkan waxa loo sameeyay in si soo noqnoqota loo isticmaalo, isla markaana ay kor u qaadaan dhaq-dhaqaaqa, badbaadada, iyo caafimaadka guud.

## Nooca DME

- **Qalabka kaalmada dhaqdhaqaaqa**: aaladaha socodka, kuraasta curyaamiinta, ulaha taageerada, ulaha caawinta, iyo skuutarrada.
- **Sariiraha isbitaalka iyo qalabkooda:** sariiraha la hagaajin karo, biraha ilaalinta sariirta, iyo joodariyaasha cadaadiska.
- **Qalabka neefsashada:** mashiinnada ururinta ogsijiinta, mashiinnada CPAP, iyo nebulaayzarada.
- **Taageerooyinka Lafaha:** Qalabka xiritaanka, xubnaha macmalka ah, iyo qalabka kabista lafaha.
- **Badqabka musqusha:** kuraasta qubayska, musqulaha la qaadi karo, iyo biraha la qabsado.
- **Qalabka kormeerka iyo daaweynta:** qalabka cabbira cadaadiska dhiigga, qalabka cabbira sonkorta dhiigga, iyo mashiinnada faleebada.



## Yaa Ka Faa'iidaysan Kara DME

- **Waayeelada** ka wajaha caqabado dhanka dhaqdhaqaaqa.
- **Shaqsiyaadka ka soo kabanaya** qalliin ama dhaawac.
- **Dadka qaba xaalado joogto ah sida** arthritis, COPD, ama macaanka.
- **Dadka naafada ah ee** u baahan qalab caawiya.



## Sida loo helo DME

- La tasho bixiyahaaga daryeelka caafimaadka si aad u hesho warqad dawo-qorid ama talo.
- La shaqee bixiye DME oo la aqoonsan yahay, adoo kaashanaya Bixiyahaaga Caymiska Medicare, si aad u hesho qalab tayo leh.
- Hubi isticmaalka saxda ah adigoo qaadanaya tababar iyo samaynaya dayactir si loo ilaaliyo badbaadada.

## Medicare, Medicaid, iyo Caymiska

- Qaybta Medicare Part B waxay daboolaysaa DME-ga caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah iyadoo la haysto warqad dawo-qorid oo dhakhtar bixiyay.
- Medicaid iyo shirkadaha caymiska gaarka loo leeyahay waxay bixin karaan faa'iidooyin dheeraad ah.
- Ikhtiyaarrada kiraysiga ama iibsashada waa la heli karaa iyadoo ku xiran shayga iyo qorshaha caymiska.

